dissolve (int.)	milan, milmi, milmaa;
put a spell on	fal, fali, fala;
have supper	cashee, cashayn, casheeyaa;
travel	safar, safri, safraa;
seep	maaxo, maaxan, maaxdaa;
excuse	raalli ka ahow, raalli ka ahaan, raalli ka ahaadaa;
It doesn't matter!	Waxba kuma jabna.

Exercises:**Translate into Somali:**

1. They decided to have supper at 7:00 p.m. but they didn't tell me the reason.
2. Today I have fever so I don't want breakfast but at 10:00 a.m. bring me some sweet tea.
3. There is no sugar in the tea. I put a lot of sugar in it but it has dissolved. Taste it and tell me if it is sweet or not.
4. To make bread one puts yeast into the dough and kneads it.
5. It was good fortune that he didn't fall off the cliff when he slipped.
6. The spy traveled with the travelers and asked them many questions.
7. I don't know whether he came or not. Go and see!
8. Either he has become fat or it is another man.
9. If the book isn't on the table it is in my room.
10. They know each other because they were born in the same town.
11. We know that he is carrying money but we are not sure whether he stole it or not.
12. Either Ali told me a lie or I thought he said something else.
13. The people of the north know some Somali words that we don't know.
14. The travelers went to the coast to bathe in the sea.
15. The evil man tried to put a spell on me but the power of God was with me.
16. The shepherd struck his breast when he saw his lamb was trapped.
17. Although we know the road it was difficult to pass through the wet places.
18. He knew my friend but he says he has changed because he has aged.
19. I don't know the man you told me about nor do I want to know him.
20. Excuse (pl.) us we are not staying because we have work.

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 44

Exercises: Cont.

Translate into English:

1. Ninkaas saaka yimid waa isla ninkii aan kuu sheegay inuu lacag badan sito.
2. Waxaa la yaqaan in qoraxdu bariga ka soo baxdo markii maalintu bilaabto.
3. Anigu ma aqaan inuu tegay iyo in kale laakiin Maxamed baa joogay, isaga weydii.
4. Hadday timaado iyo haddii kale waxba kuma jabna.
5. Ama waad noolaan doontaa ama waad dhiman doontaa.
6. Dadkii aad la hadashay ma aan aqaan mana arkin haddeer ka hor.
7. Dumarka suuqa jooga looma sheegin in sonkor beledka taal.
8. Alaabtii geela laga soo saaray waxaa la geliyey meeshii qorigu yaal.
9. Waxaa laga yaabay inay ku canaanteen markay garteen inaad shisheeye tahay.
10. Haddaad koofurta u jeeddid xagga midigtaada waa galbeedka, meeshii qoraxdu ku dhacdo.
11. Carruurta waxay fuulayaan qarka wayna qaylinayaan hooyooyinkoodse way gariirayaan
12. Gabadhii cajiinka cajiimaysay kibis wanaagsan bay ka samaysay.
13. Walaalkeed caanihii ma uu dhamin mana dhadhamin.
14. Waxay igu yiraahdeen “In aabbahaya weli nool yahay iyo in kale ma dhegaysan.”

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 45

Auxiliary Verbs “gaaraa”, “waayaa” & “karaa”:

Auxiliary verbs widen your scope of meaning with the leading verb as you learned with the future tense. Auxiliary verbs follow the infinitive of the main verb and where it is the last verb of a complex verb construction it will be declined. You saw how “doon” was declined when placed with an infinitive to form the future Tense.

- A. **“Gaaraa”** The root of this verb is “gaar”, meaning “to reach” or “to arrive”. As an auxiliary verb it lends the meaning “nearly” to the leading verb.

e.g. Wuu i toogan gaaray. He nearly shot me.
Way dhiman gaartay. She nearly died.

- B. **“Waayaa”** As you will see from your vocabulary this verb means “to fail to find”. Used as an auxiliary verb it gives the meaning of “to fail” and is very useful for negating the infinitive without using a negative. In present indicative and past tense it is conjugated irregularly.

Present Indicative

waan waayaa
waad waaydaa
wuu waayaa
way waaydaa
waannu waynnaa
waynu waaynaa
waydin waaydaan
way waayaan

Past Tense

waan waayey
waad waayday
wuu waayey
way waayday
waannu waaynay
waynu waaynay
waydin waaydeen
way waayeen

Here are a couple of examples of this verb used as an auxiliary:

e.g. Saacaddaydii waan hagaajin waayey.
I failed to fix my watch.
Wuu tegi waayey.
He failed to go (he didn't go).

One of its most useful deployments is its being employed for asking negative questions.

e.g. Maxaad cuntadii u bislayn waayday?
Why didn't you cook the food?
Maxaad iigu sheegi waayday?
Why didn't you tell me?

Waxaan kuugu sheegi waayey inaad cabsanaynin.
I didn't tell you so that you wouldn't be fearing it.

- C. **“Karaa”** You have already been introduced to this verb. Now you can use it as an auxiliary so as to reduce the clumsiness of the sentences.

LESSON 45

- e.g. Shuqulkaas waad samayn kartaa.
You can do that work.
Warqadda waannu qori karnaa.
We can write the letter.

D. More than one Auxiliary Verb:

Only one verb in the clause can be conjugated so the last one is conjugated and the others will be in the infinitive.

- e.g. Wuu samayn kari waayey.
He wasn't able to do it.
Shaqada waad dhamayn kari doontaa haddaad dadaashid.
You will be able to complete the work if you try hard.

Vocabulary:

height / length / depth;	dherer –ka
wasp	xoon –ka
bravery	geesinimo –da
green	akhdar –ka
goodness	wanaag –ga
hornet	nirgadhoob –ka
carrying cloth	xanjeer –ka
anger	xanaaq –a
ivory	foolmaroodi –ga
impartial person	xaqaani –ga
pool / pond	balli –ga
heat	kulayl –ka
fat	baruur –ta
clay	dhoobo –da
deposit	carbuun –ta
cloud	daruur –ta / xayaan –ta
tarpaulin	shiraac –a
iron (clothes)	kaawiyadee, kaawiydayn, kaawiyadeeyaa;
be envious	xaasid, xaasidi, xaasidaa;
blame	eedee, eedayn, eeddeeyaa;
confuse	qas, qasi, qasaa;
become ashamed	ceebow, ceebowbi, ceebowbaa;
go through	dus, dusi, dusaa;
herd (animals)	jir, jiri, jiraa;
be shy / modest	xishoo, xishoon, xishoodaa;
fail to find	waay, waayi, waayaa;

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 45

Exercises:

Translate into Somali:

1. The children who are sitting on the tarpaulin couldn't travel today.
2. When you talk in that language you confuse us. Speak to us in Somali.
3. The accuser who accused my friend didn't pay the deposit and that was the beginning of the trouble.
4. The children who were sick didn't eat the meat. They said it was bad.
5. The old man who didn't hear you was herding the sheep which we bought from Jama.
6. The girl who was modest stayed in the house although the other children went to see the fire.
7. When the impartial man blamed me I became ashamed.
8. The man who was fat couldn't pass through the small door. People laughed at him.
9. He liked to eat fat but now he wants to become lean.
10. If you can swim it is good but if you can't swim don't enter the sea.
11. The house with the green roof is beautiful but I am not envious.
12. When dark clouds arise we think it will rain; when we don't see clouds we don't think about rain.
13. The guest who came from the mountains was surprised at the heat.
14. When she ran on the wet track she slipped and almost fell.
15. The height of this tree and the depth of the well; the well is deep.
16. We want our girls to be modest. These days many girls are shouting.
17. If you pay a deposit he will keep it for you, but if you don't pay it he will sell it.
18. Men still kill elephants to take away their ivory. The government will punish them if the police catches them.
19. The children are playing with clay near the river.
20. The girl's mother carried her in a carrying cloth while she worked on the farm.

Translate into English:

1. Sakhraanku waa socon kari waayey oo markuu dhacay isla meeshaas buu ku jiifay.
2. In kastoo ay dadaaleen inay Cabdi eedeeyaan xaqaaniga baa iyaga canaantay inay Cabdi u sheegi waayeen.
3. Ilaah in laga cabsado waa wanaagsan tahay laakiin cabsida dadka laga cabsado waa lagu lumi doonaa.
4. Carbuuntii aad bixisay kuma filna inaan alaabtay kuu hayo waayo haddaad intii kale keeni waaydid maxay ii taraysaa?
5. Gafkan baan ceeboobay maxaa yeelay waa laygu waaniyey.
6. Ninkii shisheeyaha ahaa waxaa lagu tuhmay inuu fiirinayey in mar kale uu soo noqdo oo wax qaato.
7. Wuxuu weydiyey sidii loo galo iyo waqtiyaasha la maqan yahay.
8. Waxaydin wiilkiin yeelsiiseen inuu barto sidii loo dabaasho.
9. Miyey xusuusan kartaa meeshii ay joogtay markay qayladii maqashay?
10. Waxaad maamuustaa nin walba sharaftiisa. Haddaad wanaag ku socotid waa lagu maamuusi doonaa.
11. Ma wuxuu yahay nin caqlileh mise waa nin caqlila'?

Exercises: Cont...

12. Dadka Soomaaliyeed kolkay yiraahdaan, “Ama buur ahow ama buur ku tiirso.” maxay ula jeedaan?
13. Haddaad dadaashid guri fiican baad dhisi kari doontaa.

LESSON 46**More on Adverbs:**

- A. **Adverb particles “kala” & “wada”** In lesson 22 you learned that there are some true adverbial particles such as “sii” and “soo”. The two words “kala” and “wada” belong to this same class. They are so closely related to the verb that no other particle can stand between either one and the verb to which it is related.
- i. **“Kala”** has the idea of “in different directions” or “apart”. Hence the command “kala baxa” means, “spread out”. Sometimes “kala” is used with a compound verb involving an adjective.

e.g. Waa kala fog yihiin.
They are far separated from each other.
 - ii. **“Wada”** conveys the meaning “completely” or “without exception”.

e.g. Way wada yimaadeen.
They all came.
Waxaannu wada joognaa gurigaas yar.
We all stay together in that little house.
Lacagtaada i wada sii.
Give me all of your money.
- B. **Adverb meanings from Nouns:** In English these would be classed as adverbs of manner. In Somali the verbal particle “u” lending the concept of towardness” to the verb assists the noun into the adverbial role.
- i. **Undefined Nouns** with the verbal particle “u”

e.g. Dhaqso buu u orday. He ran quickly.
Hoos bay ula hadashay. She whispered to him.
Aad baad u shaqaysaa. You work very much (hard).
 - ii. **Nouns qualified by an adjective** with the verbal particle “u”

e.g. Sidan u yeel. Do it this way.
Si wanaagsan baad u baratay. You learned it well.
Si caajis ah bay u socdaan. They walk lazily.

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 46

iii. **Compound nouns** with the verbal particle “u”

e.g. Rag ahaan is u celiya.

Restrain yourselves in a manly fashion.

Caqli ahaan buu u jawaabay.

He answered sensibly.

C. Adverb of Degree

The word “aad” can be used to intensify the meaning of the verb or an adjective.

e.g. Waa nin aad u wanaagsan.

He is a very good man.

Aad u baar.

Look for it conscientiously.

Vocabulary:

file	soofa –ha
proverb	maahmaah –da
smallpox	furuq –a
muchness	aad
knot	guntin –ta
prophet (M)	nebi –ga
trees (coll.) / vegetation	dhir –ta
psoriasis (skin disease)	baras –ka
leprosy	juudaan –ka
carefulness / slowness	tartiib –ta
speed	dhaqso –da
pearls	luul –ka
stairs	sallaan –ka
twin	mataan –ka / -ta (pl.) mataano –ha
letter (a,b)	xaraf –ka
Koran	qur’aan –ka
father-in-law	soddog –ga
mother-in-law	soddoh –da
mane (lion)	shaash –ka
smoke	qiiq –a
tuberculosis	qaaxo –da
sharp	afaysan
snap (break something)	kala go’, kala go’i, kala go’aa;
sort	kala sooc, kala sooci, kala soocaa;
move house	guur, guuri, guuraa;
travel by night	guuree, guurayn, guureeyaa;
give news	warran, warrami, warramaa;
waste	ku cayaar, ku cayaari, ku cayaaraa;
be twisted	maroor, maroori, marooraa;
sharpen	afee, afayn, afeeyaa;

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 46

Exercises:

Translate into Somali:

1. We told him secretly to run before his enemy saw him.
2. His father-in-law speaks badly about the man who sharpens knives.
3. We went quickly because she was shouting very much.
4. He sharpened the axe with a file. See, it is sharp now.
5. The rope snapped when we pulled it (apart).
6. She wants to be rich but she wastes her money to buy pearls.
7. When they had eaten all the food they carefully wiped the table.
8. He walks like an old man; look at his gait.
9. He was very ill but he is slowly recovering.
10. The midwife is vaccinating the children so they won't get smallpox or T.B.
11. When a lot of smoke comes from the fire you know that the leaves are green.
12. The rope became twisted and when we pulled it until it was taut it snapped.
13. When they gave us news we were sad because they gave news about the death of my mother-in-law.
14. We sorted the goats and sheep before we sold them to the trader.
15. Keep this money for me because I don't like to carry a lot of money.
16. Muslims believe that the Koran came from God. They say that Mohamed was God's prophet.
17. The labourer came from the forest where he cut wood.
18. Can you distinguish between a male and female cat!
19. No, I can't but I can distinguish between a dog and a cat!
20. Those who have leprosy are often despised because people are afraid of leprosy.

Translate into English:

1. Maahmaahyo badan buu dadkaas kula hadlay. Af Soomaaliga maahmaahyo way ka buuxaan.
2. Qiiqa kor ku baxaya baan ka gartay inuu dab yaal sidaas daraaddeed qof baa jooga.
3. Markii lacagtii loo kala qaybiyey nin kasta waxaa la siiyey saddexyo toban shillin.
4. Ninkii baraska lahaa gacmahiisa dawo baa la mariyey.
5. Arrintaas markaan hoos u eegay waxaan gartay inay wada qasan tahay.
6. Labadii mataano ee isku eg ma aannu kala naqaan.
7. Hadduu aad u dadaalo shaqadii buu dhammayn doonaa intaan isaga u baahanayn.
8. Markaydin guntimaha wada furtaan xarigga sanduuqa geliya.
9. Askariga la dhaawacay waa wada bogsaday wuxuuna diyaar u yahay inuu dagaallamo.
10. Dib bay u durkeen markii ay arkeen inuu dibigu aad u soo ordayey.
11. Hoos buu iila hadlay inaan qof kale maqli karin.
12. Hor u sii orod ilaa ushii aan taagay aad gaartid.
13. Kuwa run ahaan u hadla warkood waa la aqbali karaa.

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

14. Haddii si xun loo qoro yaa garan kara waxa la qoray?
15. Ama dib u joogsada ama meeshan ka wada baxa.
16. Sidaad xarafaas u qortay waa sidii kan kale aad u qortay laakiin isla xarafka ma ay aha.
17. Sallaanka laba laba buu u koray; dhaqso buu u fuulay!

LESSON 47

Irregular Class III Verbs, “Excepting”- never & ever

A. Irregular Class III Verbs

- i. This class of verb is readily recognized when you see the principal parts as the infinitive betrays it. Having established its identity thus you can quite easily work out the declensions.

drive away eri, eryi, eryaa; cry ooy, ooyi, ooyaa,

Where this verb root ends in “i” the “i” is substituted by “y” when a vowel follows. As the continuous tenses have all of their suffixes beginning with a vowel you will again detect the irregularity.

Present Continuous Tense

Past Continuous Tense

waan eryayaa	waan ooyayaa	waan eryayey	waan ooyayey
waad eryaysaa	waad ooyaysaa	waad eryaysay	waad ooyaysay
wuu eryayaa	wuu ooyayaa	wuu eryayey	wuu ooyayey
way eryaysaa	way ooyaysaa	way eryaysay	way ooyaysay
waannu eryaynaa	waannu ooyaynaa	waannu eryaynay	waannu ooyaynay
waynu eryaynaa	waynu ooyaynaa	waynu eryaynay	waynu ooyaynay
waydin eryaysaan	waydin ooyaysaan	waydin eryayseen	waydin ooyayseen
way eryayaan	way ooyayaan	way eryayeen	way ooyayeen

You would have noticed from the above declensions that the verb “to cry” seems like a perfectly regular verb of Class I. The root ending in “y” gives that appearance in the continuative tenses and even the principal parts do not betray its irregularity. Happily for learners there are only very few to learn, so you may hardly ever meet this verb outside the vocabulary given here.

- ii. Present Indicative and Past Tense bring out the irregularity regardless of whether the root of the verb ends in “i” or “y”. It is only irregular in the second person singular and plural and the third person feminine singular.

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 47

Present Indicative

Past Tense

waan eryaa	waan ooyaa	waan eryay	waan ooyay
waad eridaa	waad ooydaa	waad eriday	waad ooyday
wuu eryaa	wuu ooyaa	wuu eryay	wuu ooyay
way eridaa	way ooydaa	way eriday	way ooyday
waannu erinaa	waannu ooynaa	waannu erinay	waannu ooynay
waynu erinaa	waynu ooynaa	waynu erinay	waynu ooynay
waydin eridaan	waydin ooydaan	waydin erideen	waydin ooydeen
way eryaan	way ooyaan	way eryeen	way ooyeen

Notice that “d” is substituted for where “s” would be used with regular verbs.

- iii. From the infinitive you can form the present tense continuous negative

e.g. eryi maayo etc.

The negative past continuous would be **ma eryaynin** and **ma ooyaynin**.
The present indicative negative can easily be worked out from the affirmative.

Negative past tense is **ma eryin** and **ma ooyin**.

Negative subjunctive is **-aan eryin** and **-aan ooyin**.

Negative continuous subjunctive **-aan eryaynin** and **-aan ooyaynin**.

You will find some Somali who treat all Class III verbs as being regular. However, it is best to stick to the correct way lest lack of application causes you to lose facility in the correct declensions.

N.B. Note that in the vocabulary list some of the verb roots take “yi” to form the infinitive. Euphony and clarity will guide you.

- B. **Excepting**: The words “mooyaane” and “maahee” are equivalents either of which can be used after a noun, pronoun or noun clause to give the meaning “excepting”.

e.g. Carruurta oo dhan waa tegeen willkan mooyaane.

All the children went except this boy.

Alaabtaydii burriskii maahee waa layga xaday.

My tools with the exception of the hammer were stolen from me.

- C. **Ever & Never**

In an earlier lesson you were introduced to the word “weli” which you have been translating as “yet” or “still”.

“Weli-ga” as a noun has the meaning “ever” and if the noun is linked with a negative verb the meaning becomes “never”.

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 47

Being a noun it can be qualified by an adjective of possession granting the meaning of everness to the possessor. Negating the verb in such instances confers the meaning of neverness on the possessor.

e.g. Weli libaax miyaad araktay?	Have you ever seen a lion?
Weligay ma aan arkin.	I have never seen one.
Ninkaas weligiis waa shaqaynayaa.	that man is forever working.
Weligiis ma nasto.	He never rests.

Vocabulary:

unintentionally	kamma' u
intentionally	kas u ...

kick backwards;	harraati, harraatiyi, harraatiyaa;
drive away	haraati, haraatiyi, haraatiyaa;
read	eri, eryi, eryaa;
ebb (tide)	akhri, akhriyi, akhriyaa;
doubt	caari, caaryi, caaryaa;
be excited	caari, caariyi, caariyaa;
cry	shaki, shakiyi, shakiyaa;
cry (of animal)	sakati, sakatiyi, sakatiyaa;
recite poem	ooy, ooyi, ooyaa;
die / be extinguished	ci, ciyi, ciyaa;
beg	gabi, gabyi, gabyaa;
miss (not hit)	gabay, gabayi, gabayaa;
oppress	baqti, baqtiyi, baqtiyaa;
	bari, baryi, baryaa;
	bari, bariyi, bariyaa;
	la waa, la waayi, la waayaa;
	dulmi, dulmiyi, dulmiyaa;
midnight	habeenbar –ka / habeenbadh –ka
knee-cap	ruug –ga
meaning	micne –ha
needle	cirbad –da
clamour	buuq –a
malaria / temperature	dhaxan –ta
doubt	shaki –ga
termites	aboor – ka
ant-hill	duddumo –da / duddun -ta
animal cry	ci –da
poem	gabay –ga
carcass	baqti –ga
ants	quraanjo –da / quraansho –da
ant-eater	qarandi –da
leave (permission)	fasax –a
net (fish)	shabag –ga

LESSON 47

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

Exercises:**Translate into Somali:**

1. When I placed the saddle on the mule it bucked but it missed me.
2. The poor person is begging for food from you. What will you give him?
3. When the camel heard the truck that was coming it ran on the road.
4. The lorry struck it and the camel fell on the ground.
5. It roared a lot before it died. We heard its cry from the town.
6. When the tide ebbs the fishermen walk carefully to see if any fish are in the nets.
7. We doubt that Rooble can come because he has fever today.
8. The boy read the letter to his grandfather while we were listening.
9. He can read well so we are very happy about it.
10. When the woman who was beaten by her husband cried the other women were surprised because they think it is not good to cry.
11. He is forever telling lies so when he gets excited and tells us something we can't believe him.
12. Our friend writes poems but he never recites them. His brother recites well.
13. The carcass of the cow was pulled away and burned completely.
14. The ant-eater is searching for ants near the ant-hill. It likes to eat ants and termites.
15. They became excited when they heard their brothers are coming.
16. We will give them leave so they can travel with their brothers.
17. What is the meaning of the clamor? Is there a big meeting today?
18. At midnight they began to travel. They hope to reach the coast before it becomes hot.
19. They doubt whether that message you gave them was true.
20. I never tell them what I think but I always tell the message that I receive.

Translate into English:

1. Haddaadan weligaa fasax qaadan shaqadaada baad nebcaan doontaa.
2. Ilaah weligiis wuxuu u naxariistaa kuwa runtiisa ku socda.
3. Markii inantii ooyday hooyadeed dhaqso bay aqalka uga soo baxday.
4. Wuxuu ii soo diray warqad ku saabsan shaqo wanaagsan oo aan doonayo.
5. Goortaan warqaddaas aqbalay aad baan u sakatiyey waayo mushaarku waa fiican yahay.
6. Intaannu si wanaagsan uga fikirin wuxuu u malaynayey inaan waxaas kas u gubay.
7. Anigu kamma' baan gubeen maxaa yeelay layma sheegin in meeshii dabka lagu qariyey.
8. Haddaad ariga ka eridid ninkii iyaga lahaa wuu kaa xanaaqi doonaa.
9. Kaneecadu waxay keenaysaa jirrada dhaxan la yiraahdo.
10. Naga raalli ahow! Maradaada kamma' baannu ugu soconay waayo waannu arki kari waaynay.
11. Habeenbadhka shanqar baa la maqlay. Markii la kacay oo siraad shiday waxaa la arkay fiidmeer.
12. Goortay ruuggeeda ku dhacday kaddib dhibaato bay ku socotay.

Exercises: Cont..

13. Waxaan Ilaah ka baryey inuu dembigayga iga qaado wuuna i dhegaystay oo ii naxariistay.
14. Dameerkaas weligiis ma uu ciyin inkastoo aad loogu dhuftay. Ninkii lahaa waa nin naxariisla'.
15. Markaydin baqasha dabadeeda joogtaan iska jira inayan idin haraatiyin.

LESSON 48

The Ordinals, Irregular Verbs “daa”, “goo” & “laa”, “as” or “like”:**A. The Ordinals**

Ordinals are words expressing position in a series. e.g. first, second, etc. In Somali, as adjectives, they follow the noun they qualify.

The ordinals are formed from the numerals by adding the suffix “-aad”.

1 st	kowbaad	2 nd	labaad	3 rd	saddexaad
4 th	afraad	5 th	shanaad	6 th	lixaad
7 th	toddobaad	8 th	siddeedaad	9 th	sagaalaad
10 th	tobnaad	20 th	labaatanaad	30 th	soddonaad
40 th	afartanaad	50 th	kontonaad	60 th	lixdanaad
70 th	toddobaatanaad	80 th	siddeetanaad	90 th	sagaashanaad
100 th	boqolaad	1000 th	kumaad		

Notice the application of the rules of euphony.

The ordinals can be nouns; they all take the masculine article “ka”.

e.g. tobnadkii the tenth one / the tenth.

B. Irregular Verbs “daa”, “goo” and “laa”

The only irregularity about these verbs is their stem. In the singular imperative, the stem, the “y” is silent. “Y” seems to be ready to stand in to join any suffix appended to this root.

leave (alone)	daa, daayn, daayaa, (daaysaa);
cut (off)	goo, gooyin, gooyaa, (gooyisaa);
slay (slaughter people)	laa, laayn, laayaa, (laaysaa);

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 48

C. As or Like

The word “si” is very versatile in Somali. Already you have seen its meaning as **way** or **manner** and how it assists another word to modify a verb in an adverbial sense. Sometimes the phrase “oo kale” placed after “sida” qualified by an adjective or adjectival phrase or clause gives the idea of “after the manner...” or “similarly”.

e.g. Sidaan sameeyey sidaas oo kale yeel.	Do as I have done.
Sidan oo kale buu u socdaa.	He walks like this.
Sidii qof caajis ah buu u shaqeeyaa.	He works like a lazy person.

The “sidii” can be omitted when “oo kale” is used.

e.g. Mid wax u baahan oo kale wuu u eeg yahay.
He looks like someone who is needy.

Vocabulary:

borrow (expendible)	ammaaho, ammaahan, ammaahdaa;
borrow (returnable)	ammaanayso, ammaanaysan, ammaanaystaa;
lend (returnable)	ammaanaysii, ammanaysiin, ammaanaysiiyaa;
harm	waxyeel, waxyeeli, waxyeelaa;
make loud noise	dhawaaq, dhawaaqi, dhawaaqaa;
call from afar	baaq, baaqi, baaqaa;
paint	renji, renjiyi, renjiyaa;
leave behind	reeb, reebi, reebaa;
kiss	dhunko, dhunkan, dhunkadaa;
extinguish (tr.)	baqtii, baqtiin, baqtiyaa;
be in need	u baaho, u baahan, u baahdaa;
snatch	dhufu, dhufan, dhufaa;
annoy	xanaaji, xanaajin, xanaajiyaa;
explain	micnee, micnayn, micneeyaa;
prove	caddee, caddayn, caddeeyaa;
expect	filo, filan, fishaa;
thanks	mahad –da
harm	waxyeello –da
thigh	bawdo –da
nostril	dul –ka
kettle / teapot	kidhli –ga / kirli –ga
rosary	tusbax –a
robe	jubbad –da
soup	maraq –a / fuud –ka;
maintenance	masruuf –ka
rust	maar –ta / mirir –ka
stranger	qariib –ka
tomatoes	yaanyo –da
flame	olol –ka
turtle	diin –ka
punishment	cigaab –ta

SOMALI GRAMMAR
VOLUME TWO

LESSON 48

forbidden by Islamic law	xaraan –ta
allowed by Islamic law	xalaal –ta
necessary / incumbent upon	ku waajib ah

Exercises:

Translate into Somali:

1. The second boy is the one who snatched the book from your daughter.
2. We didn't suspect that boy but we suspected the fourth boy.
3. Can you prove that the boy snatched it? If you mistakenly accuse him it is difficult to explain. Are you certain he is the one?
4. He painted the box the way you showed him but it isn't pretty.
5. She couldn't hear you when you called from afar because the children were making a lot of noise.
6. To eat pork and drink wine is forbidden by Islam but to marry two wives is allowed.
7. When the soldiers entered the third village they slew all the people.
8. If we leave this matter, he will expect you to leave it the second time.
9. He annoyed me when he said that I didn't know how to recite a poem.
10. The stranger extinguished the flame of his fire before he went away.
11. That widow wants her maintenance but she is afraid to ask her father for it.
12. The rusty iron was placed on the trunk and the one who received it returned thanks.
13. Don't (pl) make a loud noise because if you annoy that angry man he will harm you.
14. We lent that man who was carrying his rosary our kettle but he hasn't returned it yet. Either he has forgotten or he won't return it.
15. This is the third time you want to borrow money. Are you wasting it?
16. Leave that matter. You borrowed my umbrella many times.
17. When the tide ebbs the children look for turtles in order to sell them.
18. The mother kissed her daughter before she went abroad but the girl cried.
19. When he drank some soup from a cup the other people were very surprised at him.

Translate into English:

1. Sidee baad u filanaysaa in lagu caawiyo haddaad dadaali waaydid.
2. Ninkii jubbadda cad ku gashanaa markuu qoslo bawdadiisa buu ku dhufaa.
3. Qariibka tusbaxa sita waxaa laga arkay beledkii fogaa ee saddexaad.
4. Toban meelood oo meel canshuur ahaan baan dowladda ugu bixiyaa.
5. Waqtigii kowbaad ee aan sheekadaas maqlay waa markii aan meel cabsileh joogay.
6. Markaan ka fiirsaday si ninkaas u guulaystay waxaan rumeeyey inaan dhibaatadayda ka guulaysan karo.
7. Duddun dheer wuu ku tiirsaday markuu ka hadlayey meelaha uu ka shaqeeyey.
8. In yar oo hilib ah buu iiga gooyey intiisa weyn ee hilibka ah.
9. Tuuggu wuxuu habaryartaa ka dhufatay kiishkeedii laakiin waa nasiibkiisa maxaa yeelay waa marnaa.

Suggested Answers to Exercises of Lesson 27

English to Somali

1. Miyaad harraadsantahay / oommantahay? Biyo baan u baahanahay. Maalmahan waa / way kululaanayaan.
2. Miraha adag miyuu bislaaday. / Miraha adadag miyey bislaadeen? Maya, laakiin wuu xumaanayaa / way xunxumaanayaan.
3. Caanahu miyey dhammaadeen¹ / idlaadeen²? Cali caanaha oo dhan buu dhamay. Way dhammaadeen / idlaadeen.
4. Cali waa buurnaanayaa laakiin Maxamed waa caatowbayaa.
5. Kabahayga waa duugowbeen laakiin waan jeclaaday.
6. Maanta waa / way kululaatay. / Maanta waa / way kulushahay. / Maanta waa kulayl. Ilmaha cadcad way cascasaadeen / guduudnaadeen / guduuteen. Hooyadood daawo way marinaysaa.
7. Ilmuhu buugaggooda way illowbeen. Macallinkoodu wuu xanaaqsanaaday / xanaaqay³.
8. Beertaada baad jeclaanaysaa. Geedaha waa / way dhaadheeraanayaan.
9. Habraha⁴ waa / way buurbuurnaanayaan oo way(na) culcuslaanayaan. Raggu dumar buurbuuran way jecelyihiin.
10. Dibigeenna waa shishlaaday; maanta waan iibinaynaa.
11. Faaduma timaheeda way mayrtay / dhaqday. Timaheedu waa / way jilicsanaanayaan.
12. Roob wanaagsan baa da'ay xalayto oo beertu waa quruxsanaanaysaa.
13. Macallimiinta oo dhan baa baxay / waa / way baxeen. Ilmuhu waa / way faraxsanaadeen oo ordayaan.
14. Magacaa? / Magacaagu waa maxay? Waan illowbay. Waad duqowday.
15. Cuntada waa / way kululaatay. Xooga / wax / waxoogaa⁵ cun. Uma baahani / baahni.
16. Maqaarkii dibiga waa engeganyahay oo wuu(na) adkaaday.
17. Ninkaas shaqadiisu siday tahay? / Sidee weeye ninkaas shaqadiisa? Waan habsaday⁶ oo way xumaanaysaa.
18. Ciribtii kabtayda waa duugowbaysaa oo way(na) i xanuunaysaa.
19. Kabahaagu baa cas / waa / way cascasyihiin. Miyey casaadeen? Maya, cas / cascay bay ahaayeen.
20. Gabadh fiican bay ahayd. Way quruxsanaatay.

¹ dhammow, dhammaan, dhammaadaa;

² idlaw, idlaan, idlaadaa;

³ xanaaq, xanaaqi, xanaaqaa;
carood, caroodi, caroodaa;

⁴ habar –ta / habro –ha;

⁵ waxoogaa –ga;

⁶ hubso, hubsan, habsadaa;
hub, hubi, hubaa;

to be / become finished;

to end, be over, be all gone;

to finish, to bring to completion;

to be / become angry, to lose one's temper;

to be angry;

old woman, elderly lady; mother;

small amount, a little bit;

to ascertain / make sure for o.s., be sure;

to make sure;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 27

Somali to English

1. Your (pl.) teacher didn't need a book. His brain is good.
2. His face became white and he became sick and hot.
3. The black ram became fat but it didn't become heavy. His flesh is soft.
4. The giraffe became tall and it became fat. It entered our farm and ate a lot.
5. The guest has been late and her food is getting cold.
6. How did the livestock enter the garden? The wall is high.
7. Which wall is high? It isn't that farm / garden but it's this near farm / garden.
8. Which town did Abdi go to? It is that big and distant town?
9. Whom did you give that things / tools? Did he pay you money for it? How much did he give you?
10. This tree is becoming big and the children climb it. Its branches are long.

Suggested Answers to Exercises of Lesson 28

English to Somali

1. Ninkaasu muxuu doonayay? Wuxuu doonayay odaygii qolada / reerka.
2. Muxuu u doonayay odaygii? Ma ogi / garan maayo, ii ma / muu sheegin.
3. Gabadha / gabarta maxay samaysaa? Waxay xaaqdaa dhulka oo cuntada bislaysaa.
4. Gabdhahaas gabadhee baa raagtay? / Gabdhahaas iyama baa raagtay? / Gabdhaas tee baa raagtay? / Gagdhaas middee baa raagtay? Yay siisay warqad?
5. Umulisadii maxaad u diidday? Waayo / maxaa yeelay dharkeeda ma / may mayrin / maydhin / dhaqin.
6. Ilmuhu maxay qorayeen? Casharkooda / dersigooda way qorayeen.
7. Farasku muxuu u hardafayaa? Waayo / maxaa yeelay wuxuu maqlay qayladii¹ ilmaha / ilmaha qayladoo.
8. Macallinke baa dugsiga sare jooga? Muxuu u ashtakeeyaa² / ashtakoodaa / cabtaa³?
9. Maalmahan tacliinta miyey adagtahay? Ardadu miyey caajisanyihiin?
10. Maxaan sameeyaa? Waxaad dhigtaa miiska oo karisaa biyaha.
11. Maxaad dharkayga u laabteen / duubteen⁴? Waayo / maxaa yeelay waan ku jecelnahay.
12. Laakiin may diyaarsanayn. / Laakiin diyaar ma ahayn. Weli way qoyanyihiin. Bannaanka dhiga / sura⁵!
13. Laba buug baa ku filan / waa / way ku filanyihiin, laakiin(se) ha (ka)yarayn(in) maxaa yeelay mid ku ma filna.
14. Digo carrada / ciidda ku dar / rid. Yambada⁶ isticmaal oo dhulka fal.
15. Abuurka / iniinta waan beeray haddana geedaha waa / way soo cagaarteen⁷. Beergoyska waa / wuu dhowyahay.
16. Faa'iido badan / weyn miyaad helaysaa? Waxaas / taas baan rajaynayaa. / Sidaas baan u rajaynayaa.
17. Lo'da jirro / cudur xun bay qabaan / qabtaa. / Lo'da cudur xun baa haya / jirro xun baa haysa. Nimanku lo'da way dilayaan / bakhtiinayaan⁸, maxaa yeelay dowladda amar bay soo saartay⁹ / soo bixisay laakiinse nimanku way ka xanaaqsanaadeen;

¹ qaylo –da;

² ashtakood, ashtakoodi, ashtakoodaa;

ashtakee, ashtakayn, ashtakeeyaa;

³ cabo, caban, cabtaa;

⁴ duub, duubi, duubaa;

⁵ sur, suri, suraa;

⁶ yambo –da;

⁷ soo cagaaro, soo cagaaran, soo cagaartaa;

soo dhalo, soo dhalan, soo dhashaa;

⁸ bakhtii, bakhtiin, bakhtiiyaa;

⁹ soo saar, soo saari, soo saara;

shout, yell; clamor, noise;

to complain (to a person);

to file a suit;

to accuse, to take s.o. to court;

to sue s.o., to bring a suit;

to complain;

to fold, roll up, wind;

to put a turban on;

to point s.o. as king / leader, crown s.o.;

to wrap / tie up;

to hang s.t. on / over s.t. else;

hoe;

to sprout;

to sprout, to turn green before rain season;

to kill, strangle, extinguish;

produce, release, publish;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 28

18. Baxriyiintu / baxriyaashu way baqeen waayo / maxaa yeelay dabayshu waa dhacday oo baddu waa kacsanaatay.
19. Ninna ha ashtakayn / ashtakoodin waayo / waayo / maxaa yeelay Ilaah waa xaakinka / garsooraha¹⁰.

Somali to English

1. The people are proud but the pride of the people is not good; the glory of God is great.
2. You have / are to respect every man's dignity. God forgives believing / trusting people.
3. God obliterates / wipes out sin. Pray to God today because He loves you.
4. Who rules¹¹ this country? Do you know his name?
5. She spoke to / with you but you did not answer. Why did you refuse her?
6. The hide / skin of the fat ram is soft.
7. My shoes have become old but I have come to like them.
8. Is she the daughter of the new priest? Why is she at that place?
9. Why did the teacher close the secondary school? Because the students did something bad.
10. Why is this boy puffing / panting¹²? Because he has run from a distant place.

¹⁰ qarsoore –ha;

¹¹ xukun, xukumi, xukumaa;

¹² neeftuur, neeftuuri, neeftuuraa;

judge, mediator;

to pass judgement, to impose a sentence;

to command, govern, rule;

to pant, breathe heavily, gasp;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 29

English to Somali

1. Waa lay riixay markaasaan dhacay oo canqawgaygu waa cadgo'ay.
2. Carruuray / carruurtay / ilmow / ilmo yahow! Waxaad tagtaan guriga waayo waa laydiin yeeray / yeedhay.
3. Markaan maqalnay qaylada, xerada baan u orodnay / ku cararnay.
4. Wiil waa qalinayay / ooynayay¹, maxaa yeelay / waayo waa la dilay, laakiin hadda / imminka wuu aammusnaaday / aammusay².
5. Ardaygu Ilaah wuu rumaystay markuu gartay / kasay³ / fahmay⁴ runtii Ilaah.
6. Nijaarka waa la ashtakeeyey. Yaa ashtakeeyey? Hebel baa ashtakeeyey.
7. Waxaad xaaqdaa dhulka. Xaaqinka cusub isticmaal! Dhulka ma / miyaa la xaaqay?
8. Xaaskayga / naagtayda / afadayda iyo aniga waa nala isku daray markaan iyeda guursaday.
9. Siraadka lama shidin laakiin waxa la shiday waa dabka.
10. Ma / miyaa la qabaa? Haah, waa la qabaa.
11. Been baa lagu sheegay maxaa yeelay / waayo taas / waxaas ma / maan / ma aan samayn.
12. Buugga yaa loo diray? Waxaa loo diray inankii / wiilki Maxamed / Maxamed wiilkiisa / inankiisa.
13. Markay albaabka garaacday waa la furay markaasay / goortaasay / kolkaasay gashay.
14. Maxaad u dhaqsatay⁵ / degdegtay⁶ markaad togga aadday⁷ / tagtay?
15. Waayo arigu waa cararayeen oo fogaanayeen.
16. Idinku ilmahiinna / carruurtiina ma keenin. Ma / miyaa la ilaalinayaa?
17. Imminka / hadda / haddeer qoriga waa la jebiyey laakiin(se) in kale baan u baahanahay / waxaan u baahanahay in kale, maxaa yeelay / waayo kuma filna.
18. Usha waa la qaaday oo (la) qalloociyey, markaasay jabtay.
19. Goormaa la renjiyey / ranjiyey / rinjiyey gurigaas? Shalayto baa la renjiyey.
20. Naagtaas / afadaas waxay dhashay shan ilmo oo shantooda / shantoodana weli way noolyihiin.

¹ ooy, ooyi, ooyaa;

² aammus, aammusi, aammusaa;

³ kas, kasi, kasaa;

⁴ fahan, fahmi, fahmaa;

⁵ dhaqso, dhaqsan, dhaqsadaa;

⁶ degdeg, degdegi, degdegaa;

⁷ aad, aadi, aadaa;

to cry, weep;

to be silent, quite, to shut up;

to know, understand;

to understand;

to hurry, rush, hasten;

to hurry, rush, hasten;

to go to a place, to head for a place;

to reach / get to a destination;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 29

Somali to English

1. While we were fighting / quarreling the man kicked me. It was a heated fight / argument.
2. I put sugar in the milk and now the sugar has melted.
3. When he welded / melted the iron I was helping him and he rewarded / compensated me.
4. My trousers have become old but I am mending them.
5. That mirror is cracked but I see my beard. It has sprouted / grown.
6. Ali is coming; I recognize (know) his gait.
7. Those two houses when they were joined together the wives argued / fought.
8. We pay taxes. Ali heard (it/ that) then he ran away.
9. Who brought all that livestock? Yusuf (Joseph) bought some domestic animals and led them to the enclosure / compound / zariba.
10. A wild animal was coming to the enclosure and was looking at them, then they left / went away.

Suggested Answers to Exercises of Lesson 30

English to Somali

1. Waxay doonayaan inay dhaansadaan biyo laakiin ceelka waa dheeryahay.
2. U sheeg inay keenaan sibraar, wadaan iyo xadhig / xarig.
3. Waxaa lagu amray inuu alaabta ku celiyo, maxaa yeelay / waayo ma / muu / ma uu iibsaa.
4. Waxay jecelyihiin inay tagaan badda. Markay ka soo noqdeen waxay keeneen kalluun / mallaay (in / xoogaa¹ kalluun / mallaay ah).
5. Waxaan gaarnay markaad maqnayd laakiin(se) Faaduma guriga way nooga furtay.
6. Walaalkay waa / wuu dhaawacnaa / waa la dhaawacay, markuu galay dagaalka laakiin(se) wuu bogsanayaa.
7. Waxay u faleen dhulka inay badar beeraan.
8. Wuxuu noogu yeeray inaan cuntada diyaarino waayo / maxaa yeelay marti baa imanaysa / waa imanaysaa.
9. Waxaan ogsannahay / ognahay/ garanaynaa in cuntada ay diyaarsantahay laakiin(se) martida (weli) ma / may gaarin.
10. Hadday dadku soo raagaan cuntada waa / way qabowbaysaa.
11. Way soo raageen waayo / maxaa yeelay wiilkood waa / wuu jiranaa.
12. Haddii aad / haddaad geedka ka soo degtid hadda laguma ciqaabay² / ... laguma ciqaabi doono.
13. Markuu lo'da iibiyey lacag badan ayaa / baa / waa la siiyey.
14. Waxay sariirta u diyaarisay inaad (ku) jiiftid / jiifsatid.
15. Waxaan maqalnay in tuugag ay geleen gurigaaga / in tuugag gurigaaga (ay) geleen. Maxay (ka) qaadeen / qaateen?
16. Maan / maannu garan / ogayn in guriga madhnaa.
17. Dharka waxay u suraysaa inay engegaan³. Dharka way waraysaa⁴.
18. Ilmuhu waxay hubeen inay arkeen dameerka lunsan.
19. Waxay u ordeen inay noo sheegaan markaasay u bexeen inay xarig / xadhig helaan.
20. Askarigu colka⁵ / cadaawaha⁶ wuu dhaawacay markaas wuu / markaasuu caawiyey.

¹ xoogaa –ga;

² ciqaab, ciqaabi, ciqaabaa;

³ engeg, engegi, engegaa;

⁴ war, wari, waraa;

⁵ col –ka;

⁶ cadaawe –ha;

small amount, portion;

to punish, torture;

to take revenge;

to dry out, become dry;

to be withered;

to put s.t. out to dry;

enemy, antagonist, opponent, warriors, band;

enemy, hostile person;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 30

Somali to English

1. If they stole the black male camel they need to sell it.
2. He worked in order to enter school.
3. Why are the camels stampeding? They were stampeding in order to / to escape from a lion.
4. A thorn pricked my foot when I was running.
5. We need some / a piece of iron to scrape⁷ soil from the shoes.
6. The trader rewarded the boy to return the lost bag / purse.
7. The food is not ready because nobody / no one lit the fire. That is luck.
8. During Ramadan / the fast those men were fasting; they were not eating (anything).
9. What do you mean when you use that word?
10. I mean that I am ready to help you if you want.
11. When the old man spat his saliva fell on my leg.
12. The men-folk entered the mosque in order to / to pray when they were called.
21. Do me a favor; give me some money to buy some tea.
22. The sail / canvas is split. We are unable to go. / We are not able to go. I am going to repair it so that we (may / will) go another day.

⁷ xoq, xqi, xoqaa;

to scrape, rasp, scratch;
smooth, plane;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 31

English to Somali

1. Ma jeclin inaan cunno miro / khudrad ceeriin, hase ahaatee / yeeshee ma karno inaan helno miro / khudrad bisil / ... maan heli karno.
2. Waxaad mayrtaa / dhaqdaa dharka, markaas kaddib / dabadeed / kabacdii waxaan doonayaa / rabaa inaad laalaabtid.
3. Warqad ku saabsan magaalo qurxoon / quruxsan baan kuu soo qornay. / Waxaan kuu soo qornay warqad ku saabsan magaalo quruxsan. Miyaad heshay / aqbashay / guddoontay¹?
4. Intaanad / intaadan wax kale su'aalin / su'aal kale weydiin tag oo daawadaada² laq / daawadaada soo laq.
5. Duqsiyaasha iyo kaneecada waa / way badanyihiin oo sunta waa dhammaatay / idlaatay³ / waa la dhammeeyey.
6. Halkan waan ku sugaynaa ilaa intay awrkeenna / awrkayaga soo celiyaan.
7. Haddaanay noo soo celin, iyagaan / iyaga baan ashtakayn doonaa / ashtakaynaynaa.
8. Haddii labadaasi wiil isla egyihiin, markaasaan u malaynayaa inaan dawakhsanahay⁴ / wareersanahay.
9. Yuusuf u sheeg inuu ariga xerada geliyo⁵, intaanay / intaysan keliga ka tallaabin.
10. Waxaan aragnay inaad buugga meel uun⁶ dhigtay, laakiin waxaan illownay / illowbnay meesha.
11. Haddaad qaladdid⁷ / khaladdid ha inkirin / dafirin. Ma xukumnid / laguma xukumin, haddaad runta sheegtid.
12. Haddaadan dhammayn / idlayn⁸ shaqada maanta, berrito dhammee / idlee.
13. Markii walaashaa (ay) jirranayd, ubax quruxsan baa loo keenay.
14. Carruuray / ilmow, buugaggiinna fura, intaad macallinka sugaysaan.
15. Waxaad qabataan buugaggiinna, ilaa uu macallinku ka soo galo / ilaa intuu macallinka ka soo galo.
16. Askarigu / boolisku⁹ muxuu kuu sheegay? Wuxuu ii sheegay wax ku saabsan tuugga.
17. Inkastoo uu tegay inuu in khudrad ah soo iibsado / inuu soo iibsado xoogaa miro ah, wuxuu illowbay inuu qaato¹⁰ / geeyo / wato¹¹ lacag; sidaas daraaddeed wuu tegayaa mar kale. Waxaan rajaynayaa, inuusan illowbin mar kale.
18. Markuu / goortuu / kolkuu kula hadlay, waad qososhay; sidaas daraaddeed wuu xanaaqsanyahay.

¹ guddoon, guddoomi, guddoomaa;

² daawo –da;

³ idlaw, idlaan, idlaadaa;

⁴ dawakhsan / dawaqsan;

⁵ geli, gelin, geliyaa;

⁶ meel uun / meel un;

⁷ qalad, qaldi, waan qaladaa, waad qaladdaa;

⁸ idlee, idlayn, idleeyaa;

⁹ booliis –ka / boolis –ka;

¹⁰ qaado, qaadan, waan qaataa / waad qaadataa;

¹¹ wado, wadan, waan wataa / waad wadataa;

to accept, receive;

medicine, medication;

to finish, bring to completion;

giddy, dizzy;

to put in / into, cause to enter;

somewhere;

to make a mistake, err, blunder;

to complete, finish;

police;

to take for o.s., to accept, borrow, adopt;

to carry, have with o.s.;

to drive along for o.s.

Suggested Answers to Exercises of Lesson 31

19. Waan qoslay, waayo / maxaa yeelay ma / maan doonaynin inaan murmo. Hase ahaatee / yeeshee waan qulubsanahay / murugsanahay.
20. Caleemihii geedka / geedka caleemihiisa waa / way engegayaan¹² / engegnaanayaan / qallalayaan¹³, maxaa yeelay / waayo waxaad illowday inaad waraabisid.

Somali to English

1. When you are preparing the porridge, boil some water, because I want some tea.
2. Before the soldiers entered the house the thief escaped.
3. He was able to climb the wall, then he ran away.
4. Why did they break the door before they looked behind the house?
5. When we went to the market we met your mother and your sister.
6. Although he entered school he is not able to write his name.
7. That boy / son watered the livestock, afterwards he led them to the enclosure.
8. If you find the scissors, bring them to me, because I want to cut the paper.
9. When the wind arose the sailors were afraid, because the sea was unsettled / rough.
10. While the food is cooling / becoming cold tell me a story. Tell me a story about wild animals.

¹² engeg, engegi, engegaa;

¹³ qallal, qallali, qallalaa;
qallalan

to become dry, dry out;
to become dry, get dry;
dry;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 32

English to Somali

1. Ninka caqligaleh surwaal buu gashaday / huwaday¹ intuusan la hadlin sargaalka.
2. Nijaarka farsamadaleh u sheeg inuu sariir cusub ii sameeyo intuusan tegin Wajir.
3. Kalluunka / mallaayga waa la keenay intaan / markaan / goortaan - maqnayn. Mallaaylaha baa keenay.
4. Caanoleygaas baa na / ina khayaameeyey / khiyaameeyey sidaas daraaddeed markuu keeno caano mar kale ha ka soo iibsaa.
5. Markii wadaadka garkaleh (uu) cabbay shaahiisa Ilaahay wuu ammaanay oo wuu baxay / tegay.
6. Sacaas kafayga ah yaaleh? Annagaaleh! Miyaad doonaysaa inaad iibsatid / miyaad soo iibsaa doonaysaa / rabtaa?
7. Haddaad aqbashid shan boqol oo shilin, diyaar baan u ahay / waxaan diyaarsanahay inaan iibsado. Maya, lix boqol oo shilin baan doonayaa.
8. Lix boqol oo shilin ma lihi hadda laakiin waxaan leeyahay shan boqol oo shilin. Shalayto waxaan lahaa lix boqol iyo konton shilin.
9. Haddii mooska aad laallaadisid² / lalmisid³ way bislaanayaan / bislaan doonaan.
10. Xarig miyaad leedahay / haysataa / qabtaa si aan ugu laalaadin / lalmin karo.
11. Saaxiibyadeennu / saaxiibadeennu saaka way yimaadeen / gaareen. Waxay soo raaceen / ku yimaadeen baabuur.
12. Hadday gartaan / ogsanyihiin / ogyihiin inaad halkan joogtid way faraxsanaanayaan / faraxsanaan doonaan.
13. Intaan suuqa tegin waxaan / waxaannu u baahannahay lacag ku / nagu filan.
14. Intaas kuma filna! Markii / goortii / kolkii hore maan / maannu lahayn / haysan lacag nagu filan.
15. Sideed dariishadda / sidee baad dariishadda u jebisay? Ma / maan / ma aan jebin. Way jabnayd / waa la jebiyey markaan imid.
16. Geedahaas yaad u beeraysaa / abuuraysaa? Adeerkay / abtigay baan u beerayaa / abuurayaa.
17. Ukunleyga waa xanaaqsanaaday / carooday⁴ markaan ukumaha biyo gelinay inaan tijaabino.
18. Maxaad u malaynaysaa inuu ku diiday inuu ku oggolaado inaad biyo geliso?
19. Miyaad u malaynaysaa inuu u dadaalayay / isku dayayay / inuu na khayaaneeyo. Maya nin qiyaanoleh ma aha, laakiin wuxuu u malaynayaa in biyaha ay xumeeyaan ukumaha.
20. Webigaas waa meel cabsileh waayo / maxaa yeelay dugaag waa joogaan.

¹ huwo, huwan, huwadaa;

² laalaadi, laalaadin, laalaadiyaa;

³ lalmi, lalmin, lalmiyaa;

⁴ carood, caroodi, caroodaa;

to dress in;

to hang up, suspend;

to hang (up), suspend;

to be angry;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 32

Somali to English

1. God does not try / test us so that we do something bad, but he is a / the merciful God.
2. If you have common sense, you would try (hard) to complete the lesson before the teacher wants it.
3. How can you have patience when the children are shouting / crying?
4. I don't have a lot of patience but God helps me. Children like to shout / yell.
5. That fish vendor carries a whip in so that the dogs won't come near to him.
6. When one gets old one forgets a lot of things.
7. If you have some money give (Pl.) something to the beggar / poor person.
8. We spent all our money when we bought the meat so / therefore / on that account we don't have money.
9. When the boy / son drank the poison he became ill / sick but now he is recovering.
10. Intelligent people don't deceive their friends. A person who knows deceit⁵ is not liked.
11. That sensible / wise farmer cultivated his farm before rain fell.
12. If you wait until the rain falls, before you cultivate the farm the harvest will become small.

⁵ yaqaan;

one who knows;

Suggested Answers to Exercises of Lesson 33

English to Somali

1. Sidee baad u timid / sideed u timid? Waxaan ku imid baabuur / soo raacay baabuur. Xalayto baannu / baan nimid.
2. Muxuu kugu yiri? Wuxuu igu yiri, “Miiska waa diyaar / waa / wuu diyaarsanyahay.”
3. Maxaad tiri? Waxaan iri, “Soo dhaqso, dooni maayo inaan raago / daaho.
4. Hadday yimaadaan markaan maqannahay, waxaad ku tiraahdaa, “Halkan (ku) suga.”
5. Waxaan doonaynaa inaad gurigeenna / gurigayaga timaadid / timaadaan oo shaah cabtid / cabtaan.
6. Galab walba waxaan bilaabnaa inaan shaah cabno.
7. Haddaad dharkaaga cusub gashatid iska jir / eeg inaad meel wasakhleh / uskagleh gelin.
8. Goormaad wax cuntaa? Waxaan wax cunaa kaddib markaan tukado.
9. Waxaan u sheegnay, inaan doonayno inaad dameerkan rabbaysid. Waxaan niri, “Waxaan doonaynaa inaad dameerkan rabbaysid.”
10. Markii duunyada / xoolaha ceelasha yimaadaan waxaan garanayno / ognahay inay harraadsanyihiin / oomanyihiin.
11. Tuuladaas waa meel cabsileh, naag waa ku dagantahay¹ hadday gasho.
12. Ilaah(ii) runtiisa / runtii Ilaah miyaad rumaysantahay / rumaynaysaa? ²Waad barakadaysantahay / barakaysantahay haddaad rumaysantahay / rumaysatid.
13. Xarigga waa / wuu dheeryahay / baa dheer; gaabi. Hadda waa / wuu giigsanyahay oo taambuuggu dhici maayo / ma dhacayo.
14. Wuxuu yiri in saaka uu bilaabay inuu geela tiriyo oo weli way imaanayaan.
15. Waxay doonayaan / rabaan inaad timaadid markaad shaqadaada dhammaysid.
16. Ma lagu sheegay in ardada aabbahoodu uu imaanayo inuu kula hadlo?
17. Haah, waa la ii / lay sheegay. Waan u yeeray / yeedhay waayo / maxaa yeelay wiilashiis midkood / mid ka mid ah ma doonayo inuu halkan joogo.
18. Ilaah wuxuu yiraahdaa / amraa inaad runta sheegtid. Marar badan waa adagtahay in runta loo sheego / in la sheego runta.
19. Immisa mar / kol / goor baan kuu sheegay inaad tiraahdo “Hoodi!” intaadan soo gelin?
20. Waxaan doonayaa / rabaa inaad i cafisid waayo / maxaa yeelay wakhtigan waan illowbay / ilaabay. Kaddibna / kabacdina / dabaadeedna waxaan dadaalayaa / isku dayi doonaa inaan illowbin / ilaabin.

¹ halis –ta;

nugul –ta;

² rumayso, rumaysan, rumaystaa;

vulnerability due to danger;

vulnerability due to disease;

to believe, to accept as truth (for oneself);

Suggested Answers to Exercises of Lesson 34

English to Somali

1. Waxaad caanoleyda ku tiraahdaa / caanoleyda ku dheh, “Dhiisha ha ku lisin!” Dooni maayo inay caano dhiisha ku keento, waayo / maxaa yeelay caanaha way xumaysaa.
2. Markuu duubkiisa madaxiisa saaray / gashaday lacagtiisa sanduuq ayuu ku qariyey / qarsaday.
3. Soomaalidu / dadka Soomaaliyeed doofaarro ma daajiyaan waayo / maxaa yeelay doofaarro way necebyihiin.
4. Waxaa la baray in doofaarro yihiin duunyo / xoolo wasakhleh / uskagleh.
5. Khamri ma aan cabno waayo / maxaa yeelay waxaan doonaynaa / rabnaa inaan erayga Ilaah yeelno / addeecno.
